## Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ): Badbaadada Dugsiga Sare ee Rainier Beach

**1. Dugsiga Sare ee Rainier Beach Ma good badbaada leh baa?**

Haa. Dugsigu waa ammaan. Tijaabooyinkii ugu dambeeyay wexey sheegeen in aaney ka jirin wax **methane ah gudaha dhismaha**. Nidaamyada badbaadada ayaa lagu dhisay nidaamka aasaaska dugsiga si looga hortago methane-ka inuu galo dhismaha.

---

**2. Waa maxay methane?**

Methane waa gaas si dabiici ah uga samaysmi kara ciidda ay ku jiraan peat.

---

**3. Sidee methane halis u noqon kartaa?**

Methane waxa uu halis noqon karaa kaliya haddii uu ku ururo meel ciriiri ah oo uu taabto dab ama olol. Marka methane-ka si sax ah loo sii daayo oo aan loo oggolayn inuu ku ururo, ma aha khatar qarax.

Tijaabooyinkii ugu dambeeyay ayaa muujiyay inaysan jirin methane gudaha dhismaha iskuulka. Tallaabo ahaan, SPS waxay ku dartay tallaabooyin ilaalin ah oo hoos yimaada aasaaska si loo hubiyo badbaado muddo dheer ah. Tijaabada ayaa sii socon doonta si loo kormeero methane kasta oo ku jira dhismayaasha.

---

**4. Maxay dadku uga hadlayaan methane dugsiga?**

Meelo ka mid ah dugsiga hoostiisa waxaa ku jira ciidda ama carrada loo yaqaan peat, taasoo soo saari karta methane. Taas oo caadi ka ah qaybo ka mid ah Seattle. Sababtaas awgeed, SPS waxay qorsheysay tallaabooyin badbaado iyo tijaabooyin.

---

**5. Ma tallaabooyin badbaado ayaa laga boodey markii dugsiga la dhisay?**

Maya. **Dhammaan tallaabooyinka badbaadada ee la aqoonsaday waxaa lagu daray inta lagu guda jiray dhismaha.** Si kastaba ha ahaatee, tijaabo methane ah oo la soo jeediyay ka hor inta aan dugsigu furmin ayaa la seegay. Taasi waxay ahayd qalad. SPS waxay bilowday tijaabooyin, waxaana la sameeyay December 2025 lagu arkay in aan methane gudaha dhismaha lagu arkin

---

**6. Waa maxay astaamaha badbaadada ee dugsiga lagu dhisay?**

Dugsigu wuxuu leeyahay:

- **Nidaam methane-ka sii daaya** kaas oo ku samaysan dhismaha hoostiisa isaga oo gaasta dhismaha korikiisa ka saaraya
- **Xayndaab dhumuc leh oo aaney biyuhu karin** kaas pp kuyaal asaaska dhismaha hoostiisa isaga oo loogu talagalay xanibaadda methanke-ka iyo sayaxa

Astaamahan waxay ka caawiyaan in methane-ka laga ilaaliyo dhismaha.

---

**7. Iskuulka ma lagu tijaabiyay methane?**

Haa.

- Tijaabadii **9-kii Diseembar 2025 waxay** muujisay **in aanu dugsigu lahayn wax methane ah**.
- Qalabka tijaabadu wuxuu hubiyaa methane-ka iyo gaasaska kale ee qarxa.

---

**8. Ma sii wadi doontaa tijaabada methane?**

Haa. SPS waxay sameyn doontaa:

- Sii wadista baaritaanka methane
- Shaqaalay siinta khabiir ka madax banaan si uu u sameeyo baaritaano joogto ah
- La wadaagista natiijooyinka baaritaanka bulshada

---

**9. Yaa hubiyay shaqada badbaadada?**

- **Maul Foster & Alongi (MFA**), oo ah shirkad injineerinka deegaanka, ayaa baartay goobta waxayna dib u eegisay nidaamyada badbaadada
- **Building Envelope Technology Research (BET&R**), oo ah shirkad la-talin ah oo ku takhasustay daboolka dhismaha, ayaa hubisay xayndaabka biyaha biyaha si loo hubiyo in si sax ah loo xiray

---

**10. Maxaa kajira arrinka hoos u-degitaanka ciidda?**

Intii lagu guda jiray shaqada dhismaha, aag dhismaha ka mid ah ayaa caradiisu hoos u degtey markii culayska dhismuhu fuulay.

- Dhibaatada waa la xaliyay
- Tan iyo markii la dayactiray ma **jirin carro-go'o kale**

---

**11. Maxay SPS hadda samaynaysaa si ay u hubiso in dugsigu goob badbaado leh yahay?**

SPS wexey ku hawlantahay:

- Sii wadida tijaabada methane-ka
- Shaqaaleysiinta khubaro madax banaan si loo helo dib u eegis dheeraad ah

- La wadaagista macluumaadka iyo natiijooyinka baaritaanka qoysaska, shaqaalaha, iyo bulshada

---